



**Gacmo furan ku soo dhowow**

**Ma xanaaneysaa qof caawinaad kaaga baahan?**

**Noo saamax inaan ku caawino...**





Ma caawisaa qof ehelkaaga oo caawinaad u baahan, oo muda dheer xanuunsanaa, qof curyaan ah ama qof da' weyn oo aan iskaafin karin? Qof kaas aad caawiseysid wuxuu noqon karaa qof qoyskaaga ka tirsan, qof qaraabo ah, qof asxaabtaada ka mid ah ama dariskaaga ha ahaado waayeel ama dhali-nyaro. Ma dareemaysaa inaad masuuliyadaas aad keli ku noqotay?

Waxaa jirta caawinaad la heli karo! Degmada Gislaved waxaa jira qof ka shaqeeya gargaarka ehelka. Inaad soo wacdo oo aad ka hesho caawinaad ama talo siin.

Waxaa nagu waajib ah sir dhowr, waxaana dhamaan ku dhaqmeynaa xushmad iyo qalbi furan.

Qofkaas ehelgargaaraha wuxuu kaa caawin karaa in uu kugu hago jiho sax ah, kaaga jawaabo su'aalo, noqda qof ku garab taagan kuna dhageysta. Waxaad la kulmi kartaa dad kale oo xaaladaada oo kale ku sugaran.

Waxaan tusaale ahaan aan kuugu caawin karnaa aqoon ku saabsan noocyada kala duwan ee curyaannimada iyo cudurada, xafiisyada dowlada iyo sida ay ushaqeeyaan.

Xitaa hadii adii ay caawinaada ay tahay mid aad ugu yaboohtay, waxaa xaqiiqo ah inaad goortey noqotaba aad caawinaad u baahan doontid.

Adiga ayaa go'aansanayo. Balse ogow - inaan diyaar kuu nahay - waxa keliya oo dooneynana ay tahay inaanu ku caawino